**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**GOLAHA WADATASHIGA QARAN (GWQ)**

# WAR-MURTIYEED

**24-27 MAAJO, 2023**

**MUQDISHO-SOOMAALIYA**

## HORDHAC

Shirka 6aad ee Golaha Wadatashiga Qaran ee uu shir guddoomiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Dr. Xasan Sheekh Maxamuud ayaa ku qabsoomey Muqdisho 24-27 Maajo 2023. Shirka waxaa ka qaybgalay Mudane Xamza Cabdi Barre Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda XFS Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka XJFS Mudane Saalax Axmed Jaamac, Madaxweynaha Jubbaland Mudane Axmed Maxamed Islaan, Madaxweynaha Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Lafta-gareen), Madaxweynaha Galmudug Mudane Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor), Madaxweynaha Hirshabeelle Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe) iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Muqdisho Yuusuf Xuseen Jimcaale (Madaale).

Golaha Wadatashiga Qaran ayaa kulankooda uga doodey ajandeyaal muhiim ah oo ay ka mid yihiin: hannaanka doorashooyinka dalka, xaaladda amniga dalka gaar ahaan diyaargarowga wajiga labaad ee ciribtirka khawaarijta, dhameystirka deyn cafinta, fulinta heshiisyadii horey ay goluhu u gaareen, fatahaadaha webiyada Shabeelle & Jubba iyo qodobo kale.

## QODOBADA SHIRKA KA SOO BAXAY

Iyada oo la tixraacayo heshiisyadii iyo warmurtiyeedyadii ka soo baxay shirarkii hore ee Golaha Wadatashiga Qaran, Goluhu wuxuu ka wada hadley kuna heshiiyey qodobada soo socda:

### 1. ARRIMAHA AMNIGA

- Golaha Wadatashiga Qaran wuxuu bogaadinayaa guulaha laga gaaray istaraatiijyadda qaran ee la dagaallanka argagixisada ee ku aaddan howlgallada dhanka militariga oo ay horseed ka yihiin Ciidamada Qalabka Sida ee heer federaal iyo heer DXDF oo kaashanaya shacabka Soomaaliyeed, kuwaas oo horseeday xasilloonida guud ee dalka gaar ahaan amniga caasimadda Muqdisho.

- Sidoo kale, goluhu wuxuu bogaadinayaa habsami-u-socodka diyaargarowga wajiga labaad ee howlgallada lagu soo afjarayo kooxaha khawaarijta.
- Goluhu wuxuu shacabka Soomaaliyeed gaar ahaan deegaannada weli khawaarijtu ku harsan tahay ku adkeynayaa inay si buuxda uga qaybqaataan dagaalka ka dhanka ah argagixisada.

## 2. DOORASHOOYINKA IYO DIMUQRAADIYAYNTA

Goluhu wuxuu ka heshiiyay hannaanka doorashooyinka dalka. Qodobada laga heshiiyay sida ku cad lifaaqa Heshiiska Hannaanka Doorashooyinka waxaa ka mid ah: nooca doorashada, deegaan doorashada, nidaamka madaxtinimada, nidaamka xisbiyada, mideynta xilliga doorashooyinka, maamulka doorashooyinka iyo qodobo kale.

## 3. DEYN CAFINTA

- Goluhu wuxuu bogaadinayaa horumarka laga gaaray hannaanka deyn cafinta oo gebo gebo maraya, wuxuuna isla gartay in dhamaystirka hannaanka deyn cafinta dalka uu yahay mudnaan qaran.
- Iyadoo laga ambaqaadayo war-murtiyeedkii ka soo baxay shirkii Golaha Watashadiga Qaran ee Baydhabo 17 Maarso 2023, goluhu wuxuu isla gartay in la dejiyo qorshe lagu dardar gelinayo maareynta marxaladda ka dambeysa deyn cafinta dalka iyadoo la xoojinayo wadashaqeynta hay'adaha maaliyadda iyo adkaynta hufnaantooda.
- Si loo gaaro Soomaaliya xasilloon oo barwaaqo ah, goluhu wuxuu taageerayaa dadaallada dalka loogu sameynayo Hiigsiga Qarni-jirsiga Soomaaliya ee 2060.

SJ

27.5
2023

## 4. DHAQAN-GELINTA HESHIISYADA GWQ

- Golohu wuxuu ku adkeynayaa Xukuumadda Federaalka Soomaaliya in ay dardargeliso fulinta go'aamada iyo heshiisyadii ay horey u gaareen Golaha Wadatashiga Qaran.
- Sidoo kale, goluhu wuxuu farayaa guddiyada u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka in ay luuqad dastuuri ah u bedelaan heshiisyadii ay goluhu gaareen.

## 5. QODOBO KALE

- Midnimada iyo wadajirka dadka iyo dalka Soomaaliyeed waa waajib dastuuri ah. Goluhu wuxuu ugu baaqayaa Somaliland iyo shacabka reer Sool xabbad joojin deg-deg ah oo shuruud la'aan ah iyo in ay isugu yimaadaan wadahadal nabadeed. Sidoo kale, goluhu wuxuu ku baaqayaa in hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dowliga ahayn ee gargaarka ay dadweynaha deegaannadaas gaarsiiyaan gargaarka ay u baahan yihiin si deg-deg ah.
- Golaha ayaa hay'adaha dowladda iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya arrimaha samafalka ugu baaqay in ay gargaar degdeg ah la gaaraan dadka ku waxyeelloobay fatahaadaha wabiyada dalka.
- Golaha wuxuu boorrinayaa xoojinta wadashaqaynta hay'adaha heerarka dowladda si loo horumariyo geedi-socodka federalaynta dalka oo ay ugu horreeyaan daadejinta awoodaha iyo adeegyada.
- Golohu wuxuu ku bogaadinayaa shacabka iyo maamulka Puntland doorashadii golaha deegaanka ee ka qabsoontay degmooyinka Puntland, wuxuuna ugu baaqayaa in deegaannada aaney weli ka dhicin doorashada ay si nabad ah uga dhacdo.
- Goluhu wuxuu hoosta ka xariiqay dardargelinta jadwal hawleedka golaha si loo dhamaystiro arrimaha muhiimka u ah geedi-socodka dowlad dhiska Soomaaliya.

**--DHAMMAAD--**

**SAXIIXAYAASHA WAR-MURTIYEEDKA**

1. **Mudane Xamza Cabdi Barre**
   Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda XFS
2. **Mudane Saalax Axmed Jaamac**
   Ra'iisul Wasaare K/xigeenka XFS
3. **Mudane Saciid Cabdullahi Deni**
   Madaxweynaha Dowladda Puntland Soomaaliya
4. **Mudane Axmed Maxamed Islaan**
   Madaxweynaha Dowladda Jubaland Soomaaliya
5. **Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Laftagareen)**
   Madaxweynaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya
6. **Mudane Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)**
   Madaxweynaha Dowladda Galmudug Soomaaliya
7. **Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe)**
   Madaxweynaha Dowladda Hirshabeelle Soomaaliya
8. **Mudane Yuusuf Xuseen Jimcaale (Madaale)**
   Guddoomiyaha G/Banaadir ahna duqa Muqdishu